

## Paid Sick and Safe Time Ordinance

Hab raaca Paid Sick and Safe Time (PSST, Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxiyo iyo badbaadada) wuxuu ka doonayaa shirkadaha loo shaqeeyo inay siiyaan shaqaalaha fasaxa markay xanuunsadaan mushaarka ay ku helayaan. PSST waxaa loo adeegsan karaa maqnaanshaha shaqaaluhu ka maqan yahay shaqada xanuun awgiis, balamo caafimaad awgood, ama xaalad dhanka amaanka ah oo daran awgeed.

### SHIRKADHA LOO SHAQEYO WAA INAY SIIYAAN SHAQAALAHA PAID SICK AND SAFE TIME

#### Shaqaalaha ayaa u adeegsan kara PSST ga u aruurtay:

Si ay u daryeelaan naftooda ama qof ehelkood ah oo qaba xanuun dhanka jirka ama dhimirka ah, ayna ku jiraan aadista balanta dhakhtarka.

Si ay u daryeelaan naftooda, qof ehel ah, qof ay qol iskula nool yihiin sababo la xariira rabshad goyska ah, weerar galmo ama daba galid lagu sameeyay.

Marka meelaha daryeelka ama iskuulada ay dhigtaan xubnaha qoyskooda la xidho.

Marka goobtooda ganacsiga lagu xiro amarka saraakiisha dawladu sababo caafimaad awgood.

Shirkadaha shaqaalahu gaaraayo 250+ FTEs, marka goobtooda ganacsiga la xiro arimo la xariira caafimaadka ama badqabka.

## QIIMAYAASHA PSST

KAYDSIGA PSST GA  
SAACADHA LA  
SHAQEYAY AYAA  
GALAAYA SAACADHA  
PSST EE AAN LA  
ISTICMAALIN  
(SANADKIIBA).

	Qaybta 1	Qaybta 2	Qaybta 3
<b>FTEs Aduunyada oo ah</b>	1 shaqaalaha iyo ilaa 49 FTEs	50-249 FTEs	250 ama ka badan oo FTEs
<b>Kaydka PSST Saacado Kasta oo La shaqeeyaba</b>	1 saac 40 kii sacadood ba	1 saac 40 kii sacadood ba	1 saac 30 kii sacadood ba
<b>Qaado saacadaha PSST sanadkiiba</b>	40 Saacadood	56 Saacadood	72 Saacadood *108 saacadood shirkadaha leh PTO

#### YAA ADEEGGA HELAAYA?

Xeerarkeena ayaa daboolaa shaqaalaha ka shaqeeya gudaha daafaha Seattle, ayadoon laga eegayn aqoonsigooda soo galootiga ama goobta shirkada ay ka shaqeeyaan.

Haddii aan xaaladaadu u qalmin baaritaanka aan samayno, waxaan kuu gudbin doonaa wakaalad kale oo ku caawinaysa.

#### AARGOOSIGA

Shirkad kama aargoosan karto shaqaale sabab la xariirta:

- Raadsashada xaquuqdiisa ku cad sharciyadaan.
- U gudbinta cabasho OLS.
- U sheegista dadka kale xaquuqdooda.

#### ADEEGYADEENA

- Baaritaanada cabashooyinka.
- Isku xirka shaqaalaha.
- Caawimaad farsamo oo aan siino ganacsiga.
- Ilaha iyo gudbinada.

Fasiraada, turjumaada luuqada iyo hooyga ayaa diyaar ah. Dhammaan adeegyadu waa bilaash.



#### OFFICE OF LABOR STANDARDS

(XAAFIISKA HEERKA SHAQAALAHA EE MAGAALADA SEATTLE)

Shaqada OLS waa in la hormariyo heerarka shaqaalaha ayadoo la adeegsanaayo wada shaqayn waxtar ah oo lala yeesho bulshada iyo ganacsiyada, hormarinta xeer xoojin iyo hal abuur leh, ayadoo muhiimada la siinaayo sinaan bulsho iyo isir.

#### XOG DHEERAAD AH

**(206) 256-5297**

laborstandards@seattle.gov  
seattle.gov/laborstandards

Saacadaha shaqada: 8 am–5 pm (Isniin - Jamce)  
810 Third Ave, Suite 375, Seattle, WA 98104